

Is-Diiwaangali. Ballan qabso. Tallaalka qaado.

Gacan ka geyso in aafada caabuqa KOOFID-19 la soo afjaro.

Hadda is-diiwaangali tallaalkaaga caabuqa KOOFID-19.

Raac saddexdaan tallaabo ee fudud:

1. Iska diiwaangali khadka internetka, telefoonka ama qof ahaan

- Khadka Internetka: getvaccinated.gov.bc.ca
- Telefoonka: 1-833-838-2323 (waa lacag la'aan)
- Qof ahaan: Booqo goobta ugu dhow ee Adeegga British Kolombiya (Service BC)

2. Ballan qabso

Markaad is-diiwaangalisid ka bacdi waa lagu la soo xiriiri doonaa si aad u qabsatid ballanta tallaalka marka ugu soo horreysa oo aad xaq u yeelatid. Waxaad ballantaada ku qabsan doontaa khadka internetka ama telefoon. Waxaad dooran doontaa goobta, taariikhda iyo saacadda.

3. Tallaalka qaado

Booqo rugta tallaalka si aad u qaadatid tallaalkaaga.

Waad ku mahadsan tahay in aad qeybtaada ka qaadatid si loo sii adkeeyo ka hortagga caabuqa KOOFID-19 ee beelaheena.

Wixii xogo dheeraad ah ka ogow bartan.

fraserhealth.ca/vaccine